

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA

الرسمية

OFFICIAL



RASMIGA AH

الجريدة

BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 8aad

FAAFIN SANADLE

Muqdisho

2020

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2020

Qiiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

**KOBNIIN**

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

**SANADKA**

**2020**



Federal Republic of Somalia  
Office of the President

SHARCI LR. 37

TAARIIKH: 31/12/2020

ANSIXINTA SHARCIGA HESHIISKA CARBEED EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "q" ee Dastuurks KMG

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka GSH/347/2/B-10/20  
taariikh 29/12/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Heshiiska Carbeed ee  
La-Dagaallanka Musuq-maasuqa

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday  
Sharciga Heshiiska Carbeed ee La-Dagaallanka Musuq-maasuqa

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga  
ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 31/12/2020

  
Madaxweynaha J. F.S  
Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"



Federal Republic of Somalia  
House of the People  
Office of the Speaker

Ref: **CSH/347**2/B-10/20; الرقم:

Mogadishu, December 30, 2020 التاريخ

Ku: Madaxweyanaha Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliya  
Muqdisho

Og: Ra'iisul wasaaraha Xukuumadda Federaalka  
Muqdisho

Og: Xildhibaabada Golaha Shacabka  
Muqdisho

Og: Garyqaanka Guud ee Dawladda  
Muqdisho

Og: Hantidhawrka Qaranka  
Muqdisho

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka  
Muqdisho

Ujeedo: Ansaxin Heshiiska Carbeed ee ee La-dagalanka musuq-Maasuqa .  
Mudane Madaxweyne,

Sida aad la socoto, Heshiiska Carbeed ee ee La-dagalanka musuq-Maasuqa ee halkaan ku lifaaqan waxa soo gudbisay Xafiiska R/Wasaaraha XJFS.

Kadib waxaa ka baaraandagey oo habraacii loogu talogaly marsiiyay Xubnaha Golaha Shacabka ayna ka doodeen. Ugu danbayna wuxuu Goluhu ku ansixiyay Heshiiskan Kalfadhiga 8-aad kulankiisii 10-aad taariikhdu markay ahayd 30/12/2020, codayntuna sidaan ayay u dhacday:

**Quntin: 146; Oggol: 145;**

**Diiday: 1;**

**Ka aamustay: 0;**

Hadaba M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan qodobka 90aad xarafka (q) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka kaaga codaynaa inaad go'aanka Golaha ku ogolaato Xeer Madaxweyne, looguna soo saaro Heshiiska Carbeed ee ee La-dagalanka musuq-Maasuqa ee ee Dawladda.

Iga Guddoon Salaan Qiimo iyo

M.ne Mahad Cabdala Cawad  
Kusimaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS



Tell: +252 612224442/+252 615577472

E-mail: [speaker@parliament.gov.so](mailto:speaker@parliament.gov.so)

Website: [www.parliament.gov.so](http://www.parliament.gov.so)

**JAAMACADDA CARABTA**

**XOGHAYNTA GUUD**

**HESHIISKA CARBEED EE LA-DAGAALLANKA  
MUSUQ-MAASUQA**

## **Horudhac:**

Wadamada carabeed ee saxiixay Heshiiskan;

*Markey ku qanceen dowladaha Arabta dhaamaan*, in uu musuqa yahay dambi qaadanaya qaabab fara badan oo saameyn xun ku leh qiyamka, anshaxa, nolosha siyaasadeed, dhaqaalaha iyo bulshada;

*Iyaado la tixgeliyey* in la dagaallanka musuqmaasuqa uusan ku koobneyn mas'uuliyiinta Dowladda kaliya laakiin sidoo kale ay ku jiraan shaqsiyaad iyo ururada bulshada rayidka ah ee kaalin libaax leh ka qaadan karaan la dagaallanka musuqa;

*Iyaado la jeclestay* in la hirgeliyo dadaallada carabta iyo kuwa caalamiga ah ee lagula dagaallamayo musuqmaasuqa iyada oo ujeeddadu tahay fududeynta iskaashiga caalamiga ah ee arinkan, gaar ahaan marka loo eego isku soo wareejinta dambiiilayaasha, bixinta gargaarka garsoorka ee labada dhinac iyo soo celinta hantida;

*Markii lagu qancey* in, baahi loo qabo iskaashi Carab ah si looga hortago loona dagaallamo musuqmaasuqa iyadoo la eegayo in musuqa yahay mid calami ah;

*Iyaadoo la ixtiriaamaayo*, mabaadi'da diinta iyo akhlaaqda suuban ee diimaha Alle kali kacabsiga ku saleysan, oo ay kujiraan kuwa Ku xusan shareecada Islaamka, sida ay ugu muuqdaan ujeeddooyinka Axdiyada ee Jaamacadda Carabta iyo Axdiga Qaramada Midoobay iyo sidoo kale Carab, heshiisyo caalami ah iyo heshiisyo la xiriira dhinacyada garsoorka, garsoorka iyo iskaashiga amniga si looga hortago la dagaallamo dambiyada la xiriira musuqmaasuqa oo ay waddamada Carabtu qayb ka yihiin, oo ay ka mid yihiin Heshiiska Caalamiga ee Ka-hortagga Musuq-maasuqa (UNCAC).

*Waxaa la isku raaceen sida soo socota:*

## **Qodobka 1<sup>AAD</sup>**

### **Qeexid**

Ujeedada Heshiiskan awgeed waxaa ereyadan iyo oraahyadan soo socda loo qeexay sidan:

- 1. Dowladda Xubinta ka ah:** dal kasto oo ka mid ah Jaamacada Arabta oo ansaxiyay ama oggolaaday Heshiiskan hadda jira mise meel mariyay ansaxinta ama meel digay oggalaanshaha Heshiiskan ka qeybgalkiisa la meel digay Xoghayaha Guud ee Ururka jamacada Arabta.
- 2. Sarkaal dowladeed:** qof kasta oo ka shaqeeya shaqada loo yaaho dadweynaha ama loo arko mas'uul rasmi ah sida ku xusan shuruucda dalkaas Heshiiskan qeeb ka ah, ha ku jiro laamaha fulinta, sharci dejinta, garsoorka ama maamulka, in

qofkaasi la magacaabo ama loo doorto, si ku meel gaar ah ama si joogto ah, ama mas'uul looga digay shaqada dadweynaha. Doladaha heshiiskan qeeb ka ah, shaqsigaas oo leh ama aan lahayn mushahar.

3. **Sarkaalka dadweynaha ee ajnabiga ah:** qof kasta oo haya jago sharci-dejin, fulin, maamul ama jago garsoor dal shisheeye, in qofkaas loo magacaabo ama loo doorto, si ku-meel-gaar ah ama joogto ah, iyo qof kasta oo qabta xafiis dowladeed oo u adeega dal shisheeye ama hay'ad dowladeed oo shisheeye ama hay'ad.
4. **Sarkaal rasmi ah oo ka socda urur dowladeed caalami ah:** shaqaale dowladeed oo caalami ah ama sarkaal ama qof kasta oo ay magacowdo hay'ad dowladeed oo caalami ah oo wakil ahaan u matalaayaa.
5. **Hanti:** hanti nooc kasta ha noqotee, ha ahaato shey ama wax aan la taban karin, la dhaqaajin karo ama aan la dhaqaajin karin, iyo dhammaan waxyaabaha carbuun galaayo, ama aaladaha sharci ee caddaynaya lahaanshaha hantidaas ama xuquuqda saxda ah.
6. **Faa'iido fal dembiga:** wixii hanti ah oo laga keeno ama laga helo, si toos ah ama si aan toos ahaynba, fulinta ficil kasta oo musuqmaasuq ah oo lagu debi ka digaayo Xeerkan hadda jira.
7. **Ka joojinta dadaqaaqa ama xakamaynta:** ku soo rogista xayiraad ku meel gaar ah wareejinta, isdhaafsiiga dhaqdhaqaaqa hantida, ama la soo waregida haynta ama xakamaynta hantida, iyada oo ku saleysan amar maxkamadeed oo sharci ah ama awood kale oo u awood u leh bixinta amar kaas.
8. **La wareegis:** la weregida hantida si joogto ah katimid amar maxkamadeed ama amar kale oo awood u leh.
9. **Dhib-u-celin la xakameeyay:** in loo oggolaado hawlgallo sharci-darro ah ama laga shakiyo inay ka baxaan dhulalka hal ama dhowr wadan, ama inay ka gudbaan ama galaan, iyagoo ay ogyihiin u hay'adaha awoodda u leh kormeerkoodana, Ujeeddana ay tahay baarista falalka musuqmaasuqa ee lagu ciqaabay qodobbada quseeya Heshiiskan xaadirka ah iyo soo helidda aqoonsiga shakhsiyaadka ku jira gudashada fal dembi ah.

### **Qodobka 2<sup>aad</sup>**

#### **Ujeeddooyinka Heshiiskan**

Heshiiskan ayaa ujeedadiisu tahay:

- In la dardar galiyo talaabooyinka loga hortagayo, la dagaalanka iyo daahfurka dhammaan noocyada musuqmaasuqa iyo dambiyada kale ee la xiriira fulista dembiga, iyo in dacwad lagu soo oogo dambiilayaasha.
- In la dardar galiyo dacadimo hufnaan, xisaabtan iyo ku dhaqanka sharciga.

- In lagu dhiiri geliyo shakhsiyaadka iyo ururada bulshada rayidka inay kaqeyb ka qaataan ka hortagga iyo la dagaallanka musuqmaasuqa.

### **Qodobka 3<sup>aad</sup>**

#### **Ilaalinta madaxbanaanida**

1. Xubinta Qaran, waxay sharfi doonaan ballanqaadyadooda sida ku xusan Heshiiskan hadda jira qaab waafaqsan mabaadi'da sinnaanta dowladaha nabadeynta gobolka iyo in aan la faragelin arrimaha gudaha ee dowladaha kale.
2. Sida ku xusan Axdiga hadda jira, majiro dowlad qeeb ka ah Heshiiskan oo u qadan karto in ay awood u leedahay dul dal kale misna ku daqaaqdo howlo ay u xaddidan yihiin masuuliyiinta wadanka iyadoo la raacayo qawaaniinta dalkaas.

### **Qodobka 4<sup>aad</sup>**

#### **Dembiyada**

Iyada oo la tixgilaayo in sifeeynta falalka musuqmaasuqa, ee lagu ciqaabayo Heshiiskan hadda jira, ay ku xiran tahay shuruucda Xubinta Qaran, sida ku xusan qawaaniinteeda gudaha, uu ku dhaqmi doono sharciga lagama maarmaanka ah iyo tallaabooyinka kale ee lagu ciqaabayo falalka soo socda markii si ula kac ah loo geysto:

1. Laaluushka sarkaalka dadweynaha.
2. Laalushka ka dhaco shirkadaha aan si gaar loolaheen, shirkadaha wadaagga ah, ururada iyo hay'adaha ka shaqeeya danaha guud ee bulshada.
3. Lалуushka ka jiro waaxda gaar looleeyahay
4. Laaluushka saraakiisha u shaqeeya dowladaha ajnabiga ah iyo mas'uuliyiinta ururada caalamiga ah ee dadweynaha, musuqaan oo la xiriira ganacsiga caalamiga ah ee ka socda dowladaha Heshiiskan qeeb ka aha.
5. ka shaqeynta sameyn ku yeleyshada haladaha dowladaha
6. Ku xadgudubka xafiiska dadweynaha.
7. is kobcin sharci daro ah
8. Laabista lacaqta laga faa'iiday fal dembi kadib
9. qarinta wixii ka soo baxa fal-dambiyeedka lagu shaciyey falalka ku xusan Heshiiskan Qodobadiisa.
10. Joojinta nidaamka caddaaladda.
11. Ku-lunsiga hantida dadweynaha iyo si sharci darada ku qabsigeeda
12. Ku-xadgudubka hantida shirkadaha iskaashatada ah, ururada gaarka loo leeyahay ee ka sheqya danta guud iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay.
13. Kaqeybgalk ama isku daynimada kaqeybgalk dambiyada lagu qeexay Heshiiskan Qodobadiisa.

### **Qodobka 5<sup>aad</sup>**

#### **Mas'uliyada shaqsiyaadka qanuuneed**

Xubin Qaran kasta, waxey qaadaaysaa talaabooyinka lagama maarmaanka ah, iyada oo la raacayo qawaaniinta uu dalka leeyahay, si loo go'aamiyo

masuuliyada dambi, mida madaniga ama mida maamul ee qof kasta oo sharci ah dambiyada oo lagu sheegay Heshiiskan, iyada oo aan laga hor imaanin mas'uuliyadda dambiga ee dadka caadiga ah.

### **Qodobka 6<sup>aad</sup>**

#### **Dembi ku oogidda iyo maxkamadeenta**

1. Xubin Qaran kasta, waxay qaadaysa talaabooyinka lagama maarmaanka ah, iyada oo la raacayo qawaaniinteeda dalkeeda, si loo hubiyo in hay'adda baaritaanka awooda u leh ama maxkamada xaq u leeh inay xog u hesho ama hesho macluumaad la xiriira akoonnada bangiga markii la baarayo xaqiiqooyinka ku saabsan wixii dambi ah ee ku xusan heshiiskan hadda jira.
2. Marka laga hadlayo dambiyada heshikan lagu qeexey, Xubin Qaran kastaa waxey qaadeysaa talaabooyin ku habboon, sida waafaqsan sharciyadeeda gudaha, inay hubiso joogitaanka dacweysanaha baaritaannada iyo dhageysiga dacwadda, iyadoo la tixgalinayo xuquuqda difaaca.
3. Xubin Qaran Kasta, waxaay qaadeysaa, iyada oo la raacayo qawaaniinteeda gudaha iyo mabaadi'deeda dastuuriga ah, tillaabooyinka lagama maarmaanka u ah in la aasaaso ama lagu ilaaliyo isku-dheelitirka habboon ee u dhexeeya xasaanad kasta ama mudnaan la siiyo mas'uuliyiinta u sheqeeya dawladdaha kale si ay u fuliyaan waajibaadkooda iyo suurtagalnimada in la qaado, meeshii loo baahdo, baaritaan wax ku ool ah, dacwad oogista iyo maxkamadaynta ficillada lagu ciqaabay heshikan hadda jira.
4. Xubin Qaran Kasta, waa in aay ciqaabtaa dambi kasto ee lagu soo daro heshiiskan hadda jira iyadoo la tixgilinaayo halista dembiga. Go'aaminta ciqaabta dambiyada aan soo sheegnay waa la kordhin doonaa, sida ku xusan qodobka Xeerka Ciqaabta, haddii ay dhacdo soo noqoshada.
5. Xubin Qaran Kastaah,, si waafaqsan qaanuunkeeda gudaha iyo meeshii loga baahdo, waxay ka tix gelin doonta, inay ku soo rogaan xukun adag ama ciqaab dheeri ah kuwa lagu xukumo dambiyada sida ku xusan Heshiiskan.
6. Xubin Qaran Kasta, waxeey qeexi doonaataa, iyada oo la raacayo qawaaniinteeda gudaha, qaanuun u dhigansan oo xadey naayo wixii danbi ah ee ku xusan Axdiga hadda jira.

### **Qodobka 7<sup>aad</sup>**

#### **Joojinta Dadaqaaqa , qabsashada iyo la weregista hantida**

1. Intii suurto gal ah, dowlad kasta Heshiiskan hubna ka ah, waxey qaadeysaa, iyada oo la raacayo qawaaniinteeda gudaha, dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah in ay awood u yeeshaan la wareeggan:



- b) Macaashka ka soo baxda fal dembi ah sida ku xusan Heshiiskan hadda jira, ama hantida qiimahoodu u dhigmayo qiimaha fa'iidada laga helay falk dembiga ah.
- t) Hanti, qalab ama qalab kale oo loo adeegsaday ama loogu talagalay in lagu isticmaalo komishanka dambiga sida ku xusan Heshiiskan hadda jira.
2. Xubin Qaran Kasta, wexey qaadaaysa talaabooyinka lagama maarmaanka u ah aqoonsiga, raadraaca, qabashada, daq daqaaq joojinta mid kasta oo ka mid ah qodobbada ku xusan farqada (1) ee Qodobkan iyada oo ujeedku yahay la wareegitaankooda.
  3. Wixii macaash ah oo ka soo baxo fal-dambiyeed, qayb ahaan ama gebi ahaanba, lagu wareejiyo ama lagu beddeshto hanti kale, hantidan, halkii kaliya fa'iidada la soo qaban lahaa, waxaa lagu qaadayaa tallaabooyinka lagu soo saaray qodobka hadda jira, xitaa haddii dambiilaha uu u wareejiyay milkiilnimada hantida kuwa kale.
  4. Halk macaashka ka soo baho fal dembi ay isku darsoomaan hanti lagu helay si sharci ah, hantida noocaas ah waxaa lala wareegayaa iyada oo la xaddidaayo qiyaasta qiimaha fa'iidada ka soo baxday falk dembiga ah, iyada oo aan laga hor imaanin wax awood ah oo ku xiran daqdaqaaq joojinta ama xakamaynta.
  5. Tallaabooyinka lagu muujiyey Qodobkan sidoo kale waxa lagu dabbaqi doonaan isla qaab isku mid ah sida kuwa macaashka ka soo gala dambiyadu la xiriira dakhliyada ama dheefaha kale ee maaliyadeed ee ka soo baxa macaashka dembiga, ama hantida lagu beddeshtay falkan ama la kala wareejiyay, ama hantida macaashka fal dembi la isku qasey.
  6. Xubnaha Qaramadda waa in ay tixgeliyaan suurtagalnimada in lagu qasbo dambiilaha inuu caddeeyo sharcinimada uu ku andacoonayo macaashka ka soo baxay fal-dambiyeed ama hanti kale oo lala wareegi karo, illaa iyo inta waajibaadkaasi la jaan qaadayo shuruudaha dalka gudahiisa iyo nidaamka garsoorka iyo tallaabooyinka kale.
  7. Xubin Qaran kasta, waa in aay qaadaan sharciga iyo talaabooyinka kale ee lagama maarmaanka u ah in la abaabulo, loo maamulo lana adeegsado joojinta daqdaqaaqa, la werigista, ama hanti la dayacey kuwaas oo laga macaashay fal danbi, iyadoo la raacayo qawaaniinteeda gudaha. Tallaabooyinka noocan oo kale ah waxaa ka mid noqon kara shuruudaha soo celinta hantida ee wali gacanta ugu jirta qofka xaq u leh. Dalalka Heshiiskan hubin ka ah waa in aay tixgeliyaan talaabooyinka maamulka ama isticmaalka hantida la dayacay iyo mudada iyo jaangooyooyinka waqtiyada hantida loo arko in la dayacey.

8. Qodobbada Qodobkan ku jira looma tarjumi doono si loga takhaluso laguna liido xuquuqdaha dhabta ah ee dhinacyada saddexaad.

### **Qodobka 8<sup>aad</sup>**

#### **Magdhow ka bixinta waxyeelow**

Xubin Qaran Kasta waxey bixin doonaan si waafaqsan qaanuunk gudaha, in dhammaan dadkii waxyeelladu ka soo gaartay ficil musuqmaasuq, sida ku xusan Heshiiskan, in ay xaq u leeyihiin in ay keenaan dacwad is aay u ku donayaan magdhow waxyeeladaas soo gaarey owgood.

### **Qodobka 9<sup>aad</sup>**

#### **Ikhtisaaska Maxkamadda**

1. Dembiyada ku xusan Heshiiskan, waxaa ikhtisaaska maxkamadeentooda iskale dalka axdiqan hubna ka ah xaalad kastoo oo ka mid ah xaaladaha soo socda halka:
  - b) Dembiga, ama wax kasta oo ka mid ah ficillada caawinaayo falka, oo agu fuliyay dhulka dowlada Heshiiskan hubin ka ah;
  - t) Dembiga waxaa lagu geestay markab saaran calanka dalka Heshiiskan hubin ka ah ama diyaarad ka diiwaan gashan dalka sharciyadiisa waqtiga koomishinka falk dembiga dacey;
  - j) Dembiga waxaa laga galay dalka ama mid ka mid ah muwaaddinkeeda ama deganeheeda;
  - x) Dembiga waxaa geestay mid ka mid ah Muwaadiniinta dalka Heshiiskan hubin ka ah, mise qof sida caadiga ah degan dhulk dalka, ama qof bilaa sharci ah oo si rasmi ah u deggan dhulk dowladaha Heshiiskan qeeb ka ah;
  - k) Dembigu waa mid ka mid ah ficillada lagu ciqaabay sida uu qabo qodobka 4.6 ee Heshiiskan, waxaana lagu geystaa meel ka baxsan dhulka dalka Heshiiskan hubna ka ah, iyadoo ujeedku yahay in lagu fuliyo fal dambiyeedka gudaha dalkaas;
  - d- Eedayanuhu waa muwaadin joogna dhulka dal Heshiiskan hubin ka ah taa oo aan laga soo celin karin.
2. Xubin Qaran Kasta waxey ay qaadeysaa talaabooyinka lagama maarmaanka u ah in ficilada lagu ciqaabo Heshiiskan, iyadoo la racaayo awooda shariciga dalka markii dambiilaha geestay falka noocan ahi ku sugan yahay dhulk dal Heshiiskan hubin ka ah aan ka jirin heshis isku soo celin.
3. Halka dalka Heshiiskan hubin ka ah, iyado oo adeegsanaysaa awoodeeda hoos timaado qodobkan, la ogeysiiyay, ama uu ku ogaaay qaab kale, in dal kale ee Heshiiskan hubin ka ah ama (dalal kale) wadaan baaris ama dacwad ku qaadid ama ay qaadayaan talaabooyin sharci oo la xiriira isla falkii la geestay, ka dib

Mas'uuliyiinta awooda u leh dalk Heshiiskan xubin ka ah ama dalalk waa inay wada tashi yeeshaan iskuna dubaridaan dhammaan tilaabooyinka la qaadi karo.

### **Qodobka 10<sup>aad</sup>**

#### **Tallaabooyinka ka hortagga iyo la dagaallanka musuqmaasuqa**

1. Xubin Qrana kasta, si waafaqsan qawaaniinteeda, waa in aay dejiyaan, hirgaliyaan oona adkeeyaan siyaasado wax ku ool ah si looga hortago loona dagaallamo musuqmaasuqa. Tan waxaa ka mid noqon doona xoojinta kaqeybgalka bulshada iyo adeegsiga mabaadi'da ku dhaqanka sharciya, maamul wanaaga arimaha bulshada iyo hantida, sharafta, hufnaanta iyo isla xisaabtanka.
2. Xubin Qaran Kasta waa in aay ku dadaalaan in ay dejiyiyan qaab wax ku ool ah oo looga hortago musuqmaasuqa.
3. Xubin Qaran Kasta, waa in uu ku dadaalaa inuu sameeyo qiimeyn xilliyeed ah shuruucda quseeya iyo tillaabooyinka maamul iyada oo looga gol leeyahay in lagu soo bandhigo wax qabadkooda ku aadan ka hortagga iyo la dagaallanka musuqmaasuqa.
4. Xubin Qaran kasta waxey ku dadaalaysaa, iyada oo la raacayo qawaaniinteeda gudaha, in ay hirgaliso, xoojiso iyo taagyeerto nidaamyo muujinaya daah-furnaana iyo ka hortagga khilaafaadka danaha u dhexeeya shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha, ha ahaadaan qaybaha bulshada ama kuwa gaarka loo leeyahay.
5. Xubin Qaran Kasta, wuxuu ku dadaalayaa inuu hirgeliyo, iyada oo la raacayo qawaaniinteeda gudaha iyo nidaamkeeda, haynta diiwaan iyo shuruucda anshaxa ee saxda ah si, loo guto shaqada loo hayo dad weynaha si sharaf iyo amaan ku dehantahay.
6. Xubin Qaran Kasta, waxaay tixgalin doonaan, iyadoo la kaashanaaya sharciyadooda gudaha, dejinta tillaabooyin iyo nidaamyo si loo fududeeyo soo kud binta warbin, aay soo gudbinaayaan u shaqeeyaasha dadweynanah loona gudbinaayo hey'ad dowladeed, fal walba ee musuqmaasuq ah eey ogaadaan inta ay gudanayaan waajibaadkooda.
7. Xubin Qaran Kasta, wuxuu qaadaa talaabooyinka lagama maarmaanka u ah abuurida nidaamyo ku saleysan daah furnaan iyo tartan wanaag, iyadoo hadafka yahay dejin nidaam sah ah ah oo laxiriira soo wax soo iibsiga dowladeed iyo hanaanka istiraatiijiyadda iyadoo ujeedku tahay ka hortagga musuqmaasuqa.
8. Iyadoo laga duulayo in laga hortago musuqmaasuqa ee waaxda gaarka loo leeyahay, Xubin Qaran Kasta, waaxey qaadaan talaabooyinka lagama maarmaanka ah, iyada oo la raacayo qaanuunkeeda gudaha iyo qawaaniinta

xukuma diiwaan haynta, shaacinta xogta maaliyadeed, heerarka xisaabinta iyo dib-u-eegista xisaabaadka, si looga hortago falalkaas oo kale iyada oo ujeedadu tahay in la fuliyo mid kasta oo ka mid ah ficillada lagu ciqaabay sida ku xusan Heshiiskan:

- b) Abuuritaanka xisaabaadka buugaagta aan ku jirin.
  - t) Meesha ka saaridda is dhaafsi ganacsi buugaagta ama iyada oo aan sharraxaad ku filan laga bixin.
  - j) Diiwaangelinta kharashaadka been-abuurka ah
  - x) Gelitaanka waajibaadka maaliyadeed adigoon si dhab ah ugu faahfaahin ujeedadooda.
  - k) Adeegsiga dukumiintiyo been abuur ah.
  - d- Si ula kac ah u baabi'inta dukumiintiyada xisaaba inta aan la gaarin waqtiga sharciga uu oggol yahay.
9. Xubin Qaran Kasta waa in ay iskaashi yeeshaan dexdooda iyo hay'adaha khuseyso ee caalamiga ah iyo kuwa gobolka sida aay lagama maarmaanka u tahay, iyo iyada oo la raacayo shuruucda gudaha, si loo xoojiyo loona horumariyo tillaabooyinka lagu sheegay Qodobkan. Wadashaqeynta noocan oo kale ah waxaa ka mid noqon kara ka qeybgalka barnaamijyada caalamiga ah iyo mashaariicda loga hortagayo musuqmaasuqa.
10. Xubin Qaran Kasta, iyada oo la raacayo qawaaniinteeda gudaha, ayaa hubin doonta jiritaanka hay'ad ama wakaalado, hadba sida loogu baahdo, si looga hortago loolana dagaallamo musuqmaasuqa, sida:
- b) hirgelinta siyaasadaha lagu xusay Qodobkan iyo la socodka fulinta sida loo baahan yahay;
  - t) Kordhinta iyo faafinta aqoonta laxiriirta kahortaga musuqmaasuqa.
11. Xubin Qaran Kasta, sida ku xusan qawaaniinteeda gudaha, waxaay siin doontaa wakaalada ama wakaaladaha ku xusan cutubka kore madaxbanaanida lagama maarmaanka u ah inay awood u siiso in aay kudato/gutaan waajibaadkooda si hufan kana xoroobaan saameyn kasta oo lama huraan ah. Kheyraadka iyo agab ee lagama maarmaanka ah iyo shaqaalaha takhasuska u leh waa in ay helaan sidoo kale tababarka loogu baahan yahay shaqaalaha si ay u gutaan waajibaadkooda.

### **Qodobka 11<sup>aad</sup>**

#### **Kaqeybgalka bulshada rayidka**

Xubin Qaran kastaa waxay qaadeysaa talaabooyin ku haboon oo lagu dhiiri galinaayo ururada bulshada rayidka inay si hufan uga qeybqaataan kahortaga iyo la dagaalanka musuqmaasuqa waxeeyna ku taageeri doonaan kaqeybgalkaas tillaabooyin sida:

1. kor u qaadista wacyigalinta bulshada ee la dagaallanka musuqmaasuqa, sababaha iyo halista musuqmaasuqa iyo halista u musuqu u leeyahay danaha bulshada guud ahaanba.
2. qabashada olole warbaahineed oo lagu diidayo musuqmaasuqa iyo sidoo kale barnaamijyo wacyigelin ah, oo ay ku jiraan manhajka dugsiga iyo jaamacadda.
3. in lagu wargaliyo dadka wax ku saabsan wakaaladaha la-dagaallanka musuqmaasuqa ee lagu xusay Heshiiskan iyo in la siiyo dariiq ay kula xiriiraan hay'adahaas si logu wargaliyo dhacdooyin kasta oo loo arki karo inay ka dhigantahay ficil lagu ciqaabey Heshiiskan hadda jira.

### **Qodobka 12<sup>aad</sup>**

#### **Madaxbannaanida garsoorka iyo Xeer Ilaalinta**

Iyada oo la tixgalinayo muhiimadda aay leedahay madaxbannaanida garsoorka iyo doorkeeda muhiimka ah ee la dagaalanka musuqmaasuqa, Xubin Qaran kasta waa in aay, si waafaqsan qaanuunka u dagsan, qaadataa dhamaan dammaanad qaadyada iyo xoojinta madaxbannaanida garsoorka iyo xeer ilaaliyaasha, taageerida daacadnimadooda iyo in la siiyo ilaalin lama huraan ah.

### **Qodobka 13<sup>aad</sup>**

#### **Xayiraada falalka musuqmaasuqa**

Iyadoo oo tixgihin la siinayo xuquuqda ay leyihiin dhinac saddexaad si niyad sami ah, Xubin Qaran kastaa si waafaqsan qaanuunka u dagsan, ayaa sameeynaayo tallaabooyin lagu ciqaabay musuqmaasuqa. Iyadoo taa la duulaayo, Xubin Qaran kasta waa in aay tixgihin siyaan musuqmaasuqa in uu yahay qodob muhiim ah marka la qaadayo tillaabooyin sharci ah oo lagu burinaayo, ama lagala noqdo heshiis, lagala laabto heshiisyo kale oo la mid ah, ama la qaado wax kasta oo kale oo lagu saxayo.

### **Qodobka 14<sup>aad</sup>**

#### **Ilaalinta Warbixiyasha, markhaatiyada, khubarada iyo dhibanayaasha**

Xubnaha Qaramadda waa inay u fidiyaan badbaadada sharciga ee lagama maarmaanka u ah, warbixiyaasha markhaatiyada, khabiirada iyo dhibbanayaashu kuwaas oo bixinayaan caddeyn laxiriirta ficillada dembi ee la geestay ee ku xusan Heshiiskan. Badbaadada waxaa ka mid ah in laga ilaaliyo ehelkooda iyo kuwa ku dhow ehelkooda ficil kasta oo aargudasho ah ama cabsi gelin ah. Talaabooyinkaas oo ay ka mid yihiin:

1. Iyaga oo lagu siinaya difaac meelaha ay deggan yihiin.
2. In aan la bixin macluumaadka la xiriira aqoonsigooda ama meesha ay ku sugan yihiin.
3. warbixiyaasha, marqaatiyaasha, khubarada iyo dhibanayaashu oo bixiyaan caddeyn waa in aay u bixiyaan hab sugaayo amnigooda, sida adeegsiga teknolojiyadda is-gaarsiinta.

4. Qaadista tilaabooyin ciqaab ah qofkasta oo kashifa macluumaadka la xiriira aqoonsiga ama goobta ay ku sugan yihiin warbixiyaasha, markhaatiyada, khabiirada ama dhibbanayaasha

### **Qodobka 15<sup>aad</sup>**

#### **Taageerada Dhibbanaha**

1. Xubin Qaran kastaa waxaay dajinaysaa qawaaniin hanaan ku habboon si aay u siiso dhibbanayaasha dambiyada lagu soo xusay Heshiiskan oo lasiiyo qaabkii ay u heli lahaayeen magdhow iyo xal.
2. Xubin Qaran kastaa, waxaay siineysaa, si waafaqsan sharcigeeda gudaha, fursad ay dhibbanayaashu ku soo bandhigi karaan aragtidooda iyo in aragtidaas oo la tixgaliyo marxaladaha ku habboon ee dacwadda dambiyada lagu soo oogayo dambiilayaasha, iyada oo aan laga hor joogsanayn xuquuqda difaaca.

### **Qodobka 16<sup>aad</sup>**

#### **Iskaashiga ee Hergelinta sharciga**

Xubnaha Qaramada, waxey iskaashi ka sameynaayaan si dhaw, iyada oo la raacayo nidaamkooda sharciga iyo maamul ee gudaha, si loo hubiyo dhaqan gelinta sharciga wax ku oolka ah si loga hortago loona la dagaallamo dambiyada ku jira Heshiiskan. Wadashaqaynta noocan ahi waa inay kujirto

1. Isweydaarsiga macluumaadka ee ku saabsan qaababka loo adeegsado in lagu galo ama lagu qariyo dembiyada sida ku xusan Heshiiskan hadda jira, oo ay ku jiraan dembiyada la galay iyadoo la adeegsanayo teknolojiyad cusub, iyo in la suurtageliyo ogaanshaha fal dambi inta uusan la galin mark hore.
2. Wadashaqeynta hanaanka baarista ee kusaabsan aqoonsiyada dadka loga shakisan yahay ku lug lahaanshaha dambiyada sida ku xusan Heshiiskan, iyo goobahooda iyo howlahooda, iyo dhaq dhaqaaqa kasoobaxa iyo hantida ka soo baxda gelitaanka dambiyada noocaas ah.
3. Isweydaarsiga khubarada.
4. Wadashaqeynta bixinta kaalmada farsamada si loo diyaariyo barnaamijyada ama loo qabto aqoon isweydaarsiyo wada jir ah, ama kuwa qaas ah hal Xubin Qaran ama Xubnaha Qaramada sida loogu baahan yahay kuwa ka shaqeeya ka hortaga iyo la dagaallanka dembiyada sida ku xusan Heshiiskan, aragti si loo horumariyo aqoontooda iyo awooda wax ku oolka ah loona xoojiyo waxqabadkooda.
5. Kalfadhiyo tababar iyo aqoon isweydaarsiyo ku saabsan ka hortagga iyo xakamaynta dambiyada sida ku xusan Heshiiskan hadda jira.
6. Sameynta iyo isweydaarsiga cilmi baarista, daraasadaha iyo khibradaha laxiriira kahortaga iyo xakamaynta dambiyada sida ku xusan Heshiiskan hada jira.

7. Horumarin xogta ee shurucda qaranka, farsamooyinka baarista iyo tababbarka ugu wanaagsan ee la xiriira ka hortagga iyo xakamaynta dambiyada sida ku xusan Heshiiskan hadda jira.

### **Qodobka 17<sup>aad</sup>**

#### **Iskaashi lala yeesho masuuliyiinta fulinta sharciga**

1. Xubin qaran kastaa waxay qaadeysaa talaabooyin munaasib ah si ay ugu dhiiri geliso kuwa qeyb ka ah mise ka mid ahaa gelitaanka dambiga sida ku xusan Heshiiskan in aay bixiyaan macluumaad waxtar leh lasiiyo masuuliyiinta awooda u leh ujeeda oo aay tahay baaritaanka iyo aruurinta cadaynta, iyo in la bixiyo Caawinta wax ku ool ah hay'adaha awooda leh ee gacana ka geysan karaa in laga joojiyo dambiilayaasha ka fa'iida fal-dambiyeedka oo dib loo soo celiyo fa'iidadas.
2. Xubin Qaran kastaa waxaay tixgalin doontaa, duruufaha ku habboon, si laga yareeyo xukunka qof la soo eedayey oo kaalmo wax ku ool ah ka gaystay baaritaanka ama nidaamka dacwada wax ku saabsan dambi sida ku xusan Heshiiska hadda.
3. Xubin Qaran kastaa waxay tixgalin doonaa suurtagalnimada cafis bedelkii dembi ku oogidda, iyadoo la raacayo qawaaniinteeda gudaha, qof kasta oo ku deeqay kaalmo wax ku ool ah oo ku saabsan baaritaanka ama nidaamka dacwad qaadista marka la eego dembiyada ku xusan Heshiiskan hadda jira.
4. Dadka noocaas ah waa la ilaalin doonaa sida ku xusan qodobka 14aad ee heshiiskan hadda, iyadoo la tixgalinayo shuruudaha ee duruufaha kaladuwan.
5. Marka qofka sida lagu tilmaamey sadarka (1) ee qodobkan oo uu joogo Xubin Qaran kale isla markaana uu awood u leeyahay inuu siiyo kaalmo wax ku ool ah masuuliyiinta awooda u leh Xubin Qaran kale, labada Dowladood ay quseyso ayaa ka fiirsan doona inay ansixiyaan heshiisyo ama wax isla qabanqabiyaan. , iyada oo la raacayo shuruucdooda gudaha dalalk, si ay awood ugu siiso Xubin Qaran kale in ay u bixiyaan xalka sida ku qeexan cutubyada 2 iyo 3 ee Qodobka hadda jira.

### **Qodobka 18<sup>aad</sup>**

#### **Iskaashiga u dhaxeeya Mamulada Qaran**

Xubin Qaran kastaa, waxey si waafaqsan shuruucda gudaha, qadeysaa talabooyinka laga maarmaanka ah si loo hubiyo wadashaqeynta u dhaxeysa mas'uuliyiinteeda dadweyne, iyo sidoo kale inta u dhaxaysa mas'uuliyiinta dowladeed iyo baarista dambiyada iyo mas'uuliyiinta xeer ilaalinta. Wadashaqeynta noocan ah waxaa ka mid noqon doona:

1. ogeysiinta masuuliyiinta baaritaanka markii ay jiraan sababo lagu rumeysan karo komishinka ficil kasta oo dambi laga digay sida ku xusan qodobka 4aad ee Heshiiskan hadda la jira.
2. Bixinta dhammaan macluumaadka lagama maarmaanka u ah maamulada baritaanada marka ay soo codsadaan.

### **Qodobka 19<sup>aad</sup>**

#### **Iskaashiga u dhaxaysa masuuliyiinta Qaranka iyo waaxda gaarka loo leeyahay**

1. Xubin Qaran kastaa, si waafaqsan qaanuunkeeda gudaha, waxey qaadeysaa talaabooyinka lagama maarmaanka ah si loo hubiyo wadashaqeynta u dhaxaysa mas'uuliyiinta qaranka ee ku lug leh baaritaanka iyo dacwad ku soo oogidda iyo waaxaha gaarka loo leeyahay, gaar ahaan mas'uuliyiinta maaliyadeed, arrimaha la xiriira komishinka ficillada dambiyada lagu digay sida lagu sheegay Heshiskan hada jira.
2. Xubin Qaran kastaa waxey tixgelinaysa in aay dhiiri geliso muwaadiniinteeda iyo dadka kale ee sida joogtada ah ugu nool dhulkeeda si ay u ogeysiyaan mas'uuliyiinta qaran ee ay quseyso baaritaanka iyo dacwad ku soo oogidda komishinka fal-dambiyeedka sida ku xusan Heshiiska hadda jira.

### **Qodobka 20<sup>aad</sup>**

#### **caawinaada Garsoorka ee wadaaga ah**

1. Xubnaha Qaraamadda waxey midba midka kale u fidiyaan inta ugu badan ee suurtagalka ah ee caawinta garsoorka wadaagga ah ee baaritaanka, dacwad-ku qaadista iyo habraacyada garsoorka ee la xiriira dembiyada sida ku xusan Heshiiskan.
2. Caawimaadda garsoorka ee wadaaga ah waa in lagu bixiyaa qaabka ugu dhameystiran ee suurtagalka ah iyadoo la raacayo shuruucda dowladaa Xubinta ah ee laga codsadey iyo heshiisyadeeda, heshiisyada iyo qabanqaabada la xiriirta baaritaanka, dembi ku qaadidda iyo habraacyada garsoorka ee la xiriira dembiga loo haysto qof sharci ah iyadoo la raacayo Qodobka 5aad ee Heshiiskan hadda jira ee lagu codsanayo Doladda Xubinta ah ee laga codsanaayo.
3. Codsiga ku saabsan kaalmada garsoorka waxaa lagu sameyn karaa Heshiiska Xilligaan la joogo mid kastoo ka mid ah ujeedooyinka soo socda:
  - b) Si loo helo cadeyn ama bayaan marqaati.
  - t) Bixinta dukumiintiyada garsoorka.
  - j) In la fuliyo kormeer, qabasho iyo xayiraadda [hantida].
  - x) Si loo hubiyo walxaha loona baaro goobaha.
  - k) Si loo bixiyo macluumaad, shey, caddeyn iyo qiimeyn khibradeed.



- d- Si loo bixiyo dukumiintiyada asalka ah iyo diiwaannada, oo ay ku jiraan diiwaangelinta dowladda ama bangiyada ama kuwa shirkadaha ganacsiga ama tas-hiilaadka, ama nuqul ka mid ah oo la caddeeyay.
  - r) Si loo go'aamiyo fa'iidida dembiga ama hantida, agabyada ama waxyaabo kale, ama loo raad raaco ujeedo si loo ogaado qimahooda.
  - s) Si loo fududeeyo soo saariska mutadawiciinta ah ee dadka ee Dowladda Xubinta ah laga codsaneysa.
  - sh) Caawimaad kale oo kasta oo aan ku xadgudbinayn sharciga gudaha ee Dowladda Xubinta ah ee codsansaa.
  - dh) Siidaynta, hayaridda iyo daba-galidda macaashka soo gala fal dambiga.
  - c) Dib u soo celinta hantida si waafaqsan qodobka 27aad ee Heshiiska hadda jira.
4. Xubin Qaran walba waxeey qaadan kartaa sharciga ama talaabooyinka kale ee lagama maarmaanka ah, iyadoo la tixraacayo shuruudaha iyo ujeeddooyinka ay u aragto inay ku habboon yihiin, xukun kasta oo horay loogu xukumay eedaysanaha dowladda kale waana tixgalin kartaa iyada oo uu ujeedku yahay in la adeegsado macluumaadkaas fal-gal dacwadeed la xiriira danbi sida ku xusan Heshiiska hadda jira.
5. Xubin Qaran wablba waxey magacaabeysaa hay'ad dhexe oo leh mas'uuliyadda iyo awoodaha ay ku heli karaan codsiyada kaalmada garsoorka ee labada dhinac ah iyo inay u waafaqaan codsiyadan ama in aay ku wareejin karaan hay'ad awood u leh. Halka Xubin Qaran ay leedahay gobol ama dhul gaar ah oo leh nidaam madax-bannaan oo kaalmaynta garsoorka ah, waxay u magacaabi kartaa hay'ad dhexe oo gooni ah inay ka fuliso isla hawshaas gobolkaas ama dhulalkaas. Maamulka dhexe ayaa hubin doona hirgelinta ama wareejinta codsiyada la helay qaab ugu habboon. Marka ay awooda dhexe u gudbiso dalabka hey'ad karti u leh si talaabo looga qaado, waxay ku dhiiri gelinaysaa awooda ku shuqul leh inay ku shaqeyso codsiga waqti ku habboon si hab sax ah. Xoghayaha Guud ee Ururka Jaamacadda Carabta ayaa la ogeysiin doonaa magaca hay'adda dhexe ee loogu talagalay ujeeddadan waqtiga uu Xubinta Qaran ay gelinayso aaladda ansixinta ama ka qeyb galka Heshiskan hadda jira. Codsiyada ee caawinta garsoorka ee labada dhinac ah iyo wixii xiriir ah ee la xiriira waxaa loo gudbin doonaa mas'uuliyiinta awooda dhexe ee ay magacawday Xubinta Qaran. Tani waxay noqon doontaa iyada oo aan laga hor tagin xuquuqda ay u leedahay Xubin Qaran kasta in ay caddeeso in codsiyada iyo wada-xiriirka noocan oo kale ah lagu hagaajin doono dariiqa diblomaasiyadeed. Markey jirtu xaaladaha deg-degga ah, marka labada dowladded ee ay khusayso ay ogolaadaan, waxaa loo gudbin karaa Xafiiska Bilayska Dembiyada Carbeed iyada oo la raacayo xoghaynta guud ee lataliyaha wasiirrada arrimaha gudaha ee Carabtu, markay suurogal tahay.
6. Codsiga caawimaadda garsoorka ee labada dhinac ah waxaa kujira:
- b) Aqoonsiga hey'adda codsanaysaa

- t) Arrinta iyo nooca baaritaanka, dembi ku oogida ama habrac sharci oo laxiriirta codsiga, iyo magaca iyo howlaha hey'adda baaritaanka wado oo ay fuliso, demb ku oogida ama habraaca garsoorka.
  - j) Soo koobid xaqiiqooyinka laxiriira arinta, marka laga reebo codsiyada ujeedada loogu adeegayo dukumiintiyada garsoorka.
  - x) Sharraxaadda kaalmada la raadinayo iyo faahfaahinta tallaabo kasta oo qaas ah oo Dowladda Xubinta ah ee codsanaysaa ay doonayso in la raaco.
  - k) Aqoonsiga, goobta iyo dhalashada qof kasta oo ay quseyso, intii ay suuragal tahay.
  - d- Ujeedada caddeynta, macluumaadka ama tallaabooyinka loo raadinayo.
7. Dowladd Xubinta ah ee laga codsaday waxey codsan kartaa macluumaad dheeri ah markii loo baahdo si loo hirgaliyo codsiga si waafaqsan sharciga gudaha, ama marka ay taasi fududeyn karto fulinta.
  8. Codsiga waa in lagu dhaqmaa si waafaqsan sharciga gudaha ee Dowladda Xubinta ah ee laga codsaday iyo sidoo kale iyadoo la raacayo habraacyada lagu qeexay dalabka, meel kasta oo ay suurtagal tahay, illaa iyo intaani aysan khilaafsanayn sharciga gudaha ee Dowladda Xubinta ah ee laga codsaday.
  9. Dawladda Xubinta ah ee codsanaysa ma shaacin doonto wax macluumaad ah ama caddeyn ah oo ay siisay Dawladda Xubinta ah ee laga codsaday, ama uma adeegsan karto baaritaannada, dembi ku oogid ama xanaan garsoor aan ahayn kuwa lagu sheegay codsiga, iyadoo aan heshiis hore laga helin Dawladda Xubinta ah ee laga codsaday. barakrafkan kama hortagaayo Dowladda Xubinta ah ee codsanaysaa inta dacwada socoto macluumaad ama caddaynta qofka ee deysanaha wax dembiga loo haysto ka baabinaayo. Xaaladdan oo kale, Dowladda Xubinta ah ee Codsanaysa waxey ogeysiin doontaa Dowladda Xubinta ah ee laga codsaday, kahor int aaysan shaaca ka qaadin, wuxuuna kala tashan doontaa Dowladda Xubinta ah ee laga codsaday, haddii sidaas la weydiyo. Haddii, gaar ahaan, aysan suurogal ahayn in la sameeyo ogaysiis hore, Xubinta Qaran ee Codsaneysaa waxey ku wargalin doontaa Xubinta Qaran ee laga codsaday sideenta xogta daahid la'aan.
  10. Dawladda Xubinta ah ee codsanaysa waxeey u bahanaankartaa Dawladda Xubinta ah ee laga codsaday haynta sirta codsiga iyo waxa ku jira, marka laga reebo xaddiga loo baahan yahay si loo dhaqan geliyo. Hadi Dawladda Xubinta ah ee laga codsaday aaysan awoodin in aay buuxiso shuruudaha qarsoodida, waxey ogeysiin doontaa Dawladda Xubinta ah ee codsanaysa si ku habboon oo aan dib u dhac la'aan.
  11. Caawinaad dhanka garsoorka ah ee wada jirka ah lama siin karo halk:

- b) Codsiga looma sameynin iyada oo la raacayo sida uu digaayo Qodobkan hadda jira;
  - t) Dowladda Xubinta ah ee laga codsaday waxey mark u arkto in fulinta dalabkaasi uu ku xadgudbayo madaxbanaanideeda, amnikeeda, kala dambeynta dadweynaha ama danaha kale ee muhiimka ah.
  - j) Dowladda Xubinta ah ee laga codsaday markuu sharcigeeda gudaha ah ka mamnuucaayo mas'uuliyeeda inay fuliyaan talaabooyinka la codsaday marka la eego fal kasta oo isku dhow, iyaado dambigaasi nocaas ah lamarsiin karo baaritaan, dembi ku oogid, ama degaysi garsoor lagu qado sida ku xusan ikhtisaaskeeda u gaarka ah.
  - x) In la kulmiyo codsiga waxey isku dhacaayaaan shuruucda Dawladda Xubinta ah ee laga codsaday.
12. Xubin Qaran uma diidi karto codsi ku saabsan caawimaadda garsoorka ee wadajir ah sababtoo ah dambiga waxaa loo tixgelinayaa inuu la xiriirto arrimaha dhaqaalaha.
13. Asbaabta diidmada wixii kaalmo garsoor ee wada jir ah waa in la bixiyaa.
14. Dowladda Xubinta ah ee laga codsaday waxey hirgalinaysaa codsiga caawinta garsoorka sida ugu dhaqsaha badan iyaado oo la tixgalinaayo sida ugu badan ee suurta galka ah waqtiga mudada ah ay soo jeedisay Dowladda Xubinta ah ee codsanaysa, gaar ahaan sababaha lagu sheegay codsiga laftiisa. Dowladda Xubinta ah ee codsanaysa waxay soo bandhigi karaa weydiimaha macquulka ah si aay u hesho macluumaad ku saabsan heerka talaabooyinka ay qaadeen Dowladda Xubinta ah ee laga codsaday, in la buuxiyey codsiga iyo horumarka hadda socda. Dowladda Xubinta ah ee laga codsaday waxey ka jawaabi doontaa weydiimaha macquulka ah ee ka imanaya Dowladda Xubintah ah ee codsanaysa ku saabsan heerka codsiga iyo horumarka laga gaadhay in wax laga qabto Dowladda Xubinta ah ee codsanaysa waa in aay si dhakhso leh ugu wargaliyaa Dowladda Xubinta ah ee laga codsaday markii aan loo baahnayn caawimaada la raadinayo.
15. Dowladda Xubinta ah ee laga codsaday waxey dib u dhigi kartaa caawimaadda garsoorka ee wada jirka ah sabab la xiriirto inuu khilaafsan yahay baaritaannada socda, dacwad-qaadista ama hab raaca garsoorka
- b) Dowladda Xubinta ah ee laga codsaday, iyada oo laga jawaabay codsi caawimaad ah, iyadoo la raacayo qodobka hadda jira haddi aan jirin wax masuuliyad labo fal-dambi laga kala galey labo dal,( dual-Criminality) waxay tixgelin doontaa ujeedooyinka Heshiskan hadda jira sida lagu xusay qodobka 2aad
  - t) Xubin Qaran waa aay diidi kartaa inay bixiso kaalmo iyada oo la raacayo Qodobka hada jira oo ah fal danbi la aan labda dal laga galin.(dual criminality) Waxay bixin kartaa caawimaad aan ku lug lahayn tallaabo qasab ah waxayna

diidi kartaa inay bixiso kaalmadan oo kale markay la xiriirto codsiyo aan qiimo lahayn ama arrimaha la xiriira iskaashiga ama gargaarka ee la raadinayo lagu bixiyey qodobbada kale ee Heshiiskan hadda jira.

- j) Xubin Qaran kastaa waxey tixgelin kartaa in aay qaadato tillaabooyin ay u aragto inay lagama maarmaan u tahay inay bixiso caawimaad ballaadhan, sida ku xusan qodobka hadda jira, iyada oo ay jirto xaalad la'aanta laba dambi laga kala galey dalka.(Dual Criminality).

